

## **KU SOCOTA WAALIDIINTA AMMERUD SKOLE**

Ammerud skole waxaan sanadadii danbe si wadda jir ah uuga soo shaqaynay deegaanka iskuulka , waan ku faraxsan nahay iskuulka iyo deegaankeenaba hawsha aan ka qabanay.

Gudiga waalidiinta (FAU) waxay kulmaan hal mar bishii, waxaan ka wadda hadalnaa arrimaha si toos ah u khuseeya ardayda. Waalidiin FAU ka mid ah ayaa noogu jira Maamulka sare ee iskuulka, iyo sidoo kale guddiga Deegaanka iskuulka oon halkaa kula kulano Golaha ardayda.

Waxaan ku rajo waynahay in uu Iskuulkeenu noqdo mid ka mid ah iskuulada ugu wanaagsan.

Waxaan arragnay marka waalidka iyo iskuulku si fiican uwadda shaqeeyaan in ay keento natijjo wanaagsan. Waxaan isku daynaa inaan helno talooyin wanaagsan, awoodo kale duwan iyo dhaqaale lagu hawl galo. Waxaan hawl galinaa si dagdag ah wadda shaqaynta iyo wadda qorshaynta ka dhaxaysa FAU iyo gudiga sare ee Iskuulka, waxaan isku daynaa inaan muujino oon wax ka qabano meelaha ay dhibaatooyinka ka jiraan inta ayna balaadhan si aan u helo xal shaqynaya iyo helitaanka fahan ballaadhan oo ka wanaagsan midba midka kale aragtidiisa iyo go'aanadiisa.

Tilmaamaha Iskuul wanaagsani kuma koobna keliya in uu iskuulku ku fiicnaado imtixaannada qaran iyo inuu ka fogaado kiisaska la xidhiidha cayda iyo canbaaraynta carruurta dhexdooda (mobbing).Iskuulka xaafadu waa xaarun laga heli karo waxyaabo kale oo ka baxsan waxbarashada iyo wixii laga heli karo qoyska. Iskuulku waa goob lagu tababarto, lagula kulmo asxaabta, waa goob wax lagu kala iibsan karo sida 17-ka Meey iyo waliba waa goob lagu qabsado shirarka. Adiga waalid ahaan sidoo kale waxaad ka qayb qaadan kartaa hagaajinta anshaxa iskuulka, sidaa darteed waxaan hoos ku soo qornay qodobbo aan dooneyno inaad ka fikirtaan.

**Codsiga FAU ee ku socota waalidiinta iskuulka Ammerud**

**(Fasalada 1aad-3aad)**

- Ilmahaaga kala hadal waxyaabaha ku saabsan musquusha iyo qolka lebiska si aan nadaafada u ilaalino
- Hubso in uu ilmahaagu imaado iskuulka isaga oon daalneyn, in uu soo xaadiro wakhti sax ah, inuu watto qalabka iskuulka, dhar uu ku badashto iyo cuntada iskuulka.
- Ka caawi ilmahaaga in uu barto heshiisyada ciyaarwadaagta carruurta kale.
- Ka qeybgal kooxaha asxaabta fasalka ( vennegrupper).
- Ka qaybgal kulamada bulsheed ee fasalka iyo shirarka waalidka.
- Waa in aad xafladaha dhalashoonyinka si sinaan ah carruurta kale uga qayb galinkartaan, marka laydin soo casumana waa in aad xooga saartaan inaad caruusamada tix galisaan.
- Xasuusnow in aad magaca ilmaha ku calaamadeyso dharka ilmahaaga!
- Isku day inaad heshid ilmo kale oo uu ilmahaagu weheshado waddada udhaxsa iskuulka iyo guriga markuu kaligii socdo.

#### **(Fasalada 4aad -7aad)**

- Inta badan waxyaabaha lagu soo bartay fasalada hoose weli waa muhiim.
- Isticmaalka luqadda: La soco guriga haddii carruurtu isticmaalaan ereyo foolxun ama ereyo cay ah. Wuxaan rabnaa inay caruurtu si wanaagsan oo edeb leh u wada hadlaan. Waa maxay macnaha ereyada foosha xun? Sideed jeelaan lahayd in laguula hadlo? Maxaynaan u rabin carruurta inay u adeegsadaan ereyo fool xun guriga iyo iskuulka? Maxaan sameyn karnaa haddii aan la kulanno in ardayda kale loogu yeedho ereyo foolxun? Waa muhiim inuu ilmuu fahmo su'aalah.
- Takoorida iyo xoog sheegashada: Ka fikir haddii uu jiro ilmo ka mid ah fasalka ilmahaaga oo la takooro oon saxiib haysan. Weydii oo warayso carruurta aada fasalka si loo ogaaado ilamaha dhiban. Waxaa laga yaabaa inaad la xidhiidhi kartid ilmaha waalidkiis si aad u ogato in waalidkaasi ogyihii xaalada ilmihiisa?

- Isticmaalka telefoonada iyo social media- FAU waxay dhiiri galineysaa sharci guud oo ah in carruurtu aysan fariin u dirin ilamaha kale wixii ka dambeeyaa 21 pm.

**Khusaysaa fasalada oo dhan:**

- FAU waxay waalidiinta ka codsaneysaa inay caruurta iyo waalidkuba uhogaansanaadaan shuruucda iskuulka ee khuseeya isticmaalka mobilada iyo isticmaalka adeegyada khadka xiliga iskuulka.

FAU sin nettside:[Foreldrenes Arbeidsutvalg \(FAU\) \(osloskolen.no\)](https://www.osloskolen.no/foreldrenes_arbeidsutvalg)

FAU på Facebook:[FAU Ammerud skole | Facebook](https://www.facebook.com/FAU.Ammerud.Skole)

Tilmaamo waxtar leh oo ka socda FAU:

Appka Google ee Xakamaynta / Xaddidida Moobilka:

<https://families.google.com/intl/no/familylink/>

Bogag facebook ah oo waxtar leh.

<https://www.facebook.com/barnevakten.no>

<https://www.facebook.com/nettpatruljenoslo>

<https://www.reddbarna.no/vart-arbeid/barn-i-norge/nettvett/nettvettreglene/>

<https://nettvett.no/ti-tips-a-takle-nettmobbing/>

<https://www.facebook.com/Medietilsynet>

**Maxaa ka socda xaafadda? La soco boggan**

<https://www.facebook.com/aktivigrorud>